

Xeerka KaalmadaKaalmada Dhaqaalaha Bukaanka ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutch Lifaaqa III - Xaashida Macluumaadka AGB

Xarunta Kansarka Fred Hutch ayaa go'aamisa Caadi ahaan Qiidmada Laga Qaado Bukaanka (Amounts Generally Billed, AGB) qaab sanadle ah ayadoo adeegsanaysa "qaabka dib u eegista," ee lagu qeexay Qaybta Xeerka Qasnajiga 1.501(r)- 5(b)(1).

1. Xisaabinta AGB:

- Sanad kasta, Waaxda Dhaqaalaha ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutch ayaa uruurisa xogta sheegasho kasta sanad miisaaniyeedka kaasoo leh baaqiga dhammaadka ee la heli karo oo dhan <\$1000.
- Tan waxaa ku jira sheegashooyinka taariikhda isbitaal ka bixista ee sanad miisaaniyadeedka kahor. Sanad miisaaniyadeedka Xarunta Kansarka ee Fred Hutch waa Luuliyo 1 ilaa Juun 30.
- Sheegashooyinka Qofku iskiis u dhiibaayo waa laga reebayaa.
- Boqoleeyda AGB sanadlaha ah ee Xarunta Kansarka Fred Hutch ayaa u dhiganta cadadka ay bixiyaan qarash bixiyaasha dhinacyada sadexaad oo loo qaybiyay wadarta guud ee lacagaha la xiriira sheegashooyinkaas inta lagu jiro sanad miisaaniyadeedka.

Xisaabta waxaa lagu soo koobay sida soo socota:

AGB% = Wadarta Guud ee Lacagaha Caymisyadu Baxsheen Sanad Miisaaniyadeedkii hore/Wadarta Guud ee Qarashaadka

2. Wakhtiga iyo Isticmaalka AGB:

- Waaxda Dhaqaalaha (Finance Department) ee Xarunta Kansarka Fred Hutch ayaa go'aamin doonta boqoleeyda hadda ee AGB, kadib Xarunta Kansarka ee Fred Hutch ayaa bilaabi doonta inay boqoleeyda hadda ee AGB dhaqan geliso, 120 maalmood gudahood dhammaadka sanad miisaaniyadeedka.
- Bukaannada loo aqoonsado inay u qalmaan kaalmada dhaqaale sida ku cad Xeerka KaalmadaKaalmada Dhaqaalaha Bukaanka ee Xarunta Kansarka ee Fred Hutch ayaan laga qaadi doonin qarash ka badan cadadyada caadiyan laga qaado ("AGB") shaqsiyaadka caymiska haysta. Bukaannada u qalma ee leh caymiska ayaan shaqsiyan masuul uga noqon doonin bixinta wax ka badan AGB kadib marka ay dhammaadaan lacagaha ay bixinayso shirkada caymisku.

3. Laga bilaabo Diseembar 1, 2024, AGB ga Xarunta Kansarka ee Fred Hutch waa **44.94%** (oo lagu saleeyay xogta sheegashooyinka sanad miisaaniyadeedka 2024).